



## Codsiga aqoonsiga qaxootinimo ee Canada

Ma ka baqeysa in aad dalkaagi dib ugu noqotid? Waxaa suurtoowda in aad Canada ka heshid badbaado qaxooti ahaaneed.

Waxaa jira nidaamyo ku saabsan qofka ku codsan kara qaxootinimo iyo qofka qoxooti ahaan loo aqbali karo. Sidaas daradeed waxaa haboon in aad la tashatid kilinikada sharicga ama garyaqaan aqoon u leh sharciga qaxootiga ee Canada.

Sida ugu dhaqsi badan u raadi la-talin sharciyeed. La-daahiddu waxey u muuqan karta in aadan dhab ahaan cabsi ka qabin in aad dalkaaga dib ugu noqotid. Iyo haddii laguugu amro in aad Canada ka baxdid, waxey keeneysaa in aadan helin wakhti aad codsigaaga ku gudbis.

Kadib markaad ku sifoowdid qof qaxootinimo ku doodi kara, waxaa lagu siin doonaa PIF si aad u soo buuxisid. PIF "Personal Information Form" waa foom aad si gaar ah uga xogwareysid wixii adiga ku qabasaday iyo waxaad ka baqeysid.

### Muddo intee le'eg baan haaystaa si aan u buuxiyo PIF-ka?

Markii aad buuxisid PIF-ka waxaad ugu dirtaa Guddoonka Socdaalka iyo Qaxootiga (Immigration and Refugee Board) ama IRB muddo 28 cisho ah oo laga soo bilaabo markii lagu siiyey PIF-ka. Haddii PIF-ka boostada laguugu soo diray, muddada aad ku direeysid PIF-ka waa 35 maalmood oo ka soo bilowda markii laguugu soo diray.

Haddii aad PIF-ka la daahdid, waxaa dhici karta in IRB ay diido in ay dhugato codsigaaga. Wakhti dheeri ah waad weydiisan kartaa, laakin waa in aad codsataa inta ayan dhammaan muddada loogu talagalay in aad ku dhammeeyso.

IRB waxey dhageysanaysaa dacwaddaada si ay go'aan uga gaaraan in aad qaxooti tahay iyo in kale. Inta lagu jiro dhageysiga, waxaa lagu weydiindoona su'aalo la xiriira codsigaaga.

Dacwaddaada goortii laga'a dhageeysanayo waxaa saldhig u ah PIF-ka aad soo buuxisay. Sidaas darteed waa in aad PIF-ka ku buuxisaa xogwaran dhab ah oo dhammeystiran. Haddii ay ku suurtoowdo, buuxinta PIF-kaaga u raadso caawinaad shariciyeed.

### Dhageysiga dacwadeyda wax iga caawiya ma heli karaa?

Xaq baad u leedahay in aad qabsatid garyaqaan dhageysiga dacwadaada gacan kaa siiya. Garyaqaanka aad qabsaneysid waa inuu ahaadaa mid loo ogol yahay in uu aqoonta sharciga uga shaqeysto Canada. Ururka Ontario oo Dadka ka Caawiya Arrimaha Sharciga (Legal Aid Ontario) ayaa kaa bixinaaya kharajka garyaqaanka haddii aadan adigu iska dhiibi karin.

Haddii aad qabsatid qof aan garyaqaan ahayn, iska hubi inay ka tirsan yihiin Uruurka Canada ee la-taliyaasha Socdaalka (Canadian Society of Immigration Consultants). Legal Aid Ontario ka bixin maayso kharajka la-taliyaha.

**Haddii aad dooneysid in aad cinwaankaaga bedesho, waa inaad cinwaankaaga cusub isla markaas aad siisa garyaqaankaaga iyo waaxda socdaalka. Haddii aadan taas sameyn, waxaa suurtoowda in aadan helin warqado kiiskaaga muhiim u ah.**

### Maxaa dhacaya haddii ay IRB oggolaato dacwaddaada?

Mar haddii IRB ay go'aan ku gaarto in aad qaxooti tahay, waxaad haaysataa 180 cisho si aad u codsatid in aad noqoto dagane dalka u jooga si joogta ah.

Codsigaaga, waa in aad ku sheegtaa ninkaaga, xaaskaaga, ama saaxiibkaa/saaxiibtaa, iyo wixii caruur ah oo adiga kuugu tiirsan. Waxba dhimmi meeyso haddii ay gudaha ama dibedda Canada joogaan—waa inaad kulligood sheegataa. Jaalkaagu waxuu ahaan kara qof aad isla tihiin nin/naag ama aad kala duwan tihiin.

Isla codsigaan, xitaa xubnaha qooykaaga waad ugu dalbi karta xaaladda degenaanshaha joogtada ah. Tan adiga ayaa ikhtiyaan u leh waxa aad ka yeleysid.

Kharaj ayaad dhiibeysaa si aad dalabka u sameysid. Waxaa suurtoowda deyn aad isaga bixisid kharajka dalabka in aad heshid. Hey'adaha

↪ bogga 2aad warar kale ayaa ku qoran ↪



beesha la shaqeyaa qaxootiga ayaa si fiican wax kaaga sheegi kara sidii aad deeynta ku heli lahayd.

Waxey kale oo ka caawini karaan wixii aad sameyn lahayd haddii aad gafto muddaddii 180 cisho ahayd oo lagaa rabey in dalabka xaaladda degaanshaha joogtada ah aad ku dhammeysid.

## Maxaa dhacaya haddii ay IRB dacwaddayda diido?

Taasi micnaheedu waxaa weeye in aadan xaq u lahayn in aad Canada ku joogto qaxooti ahaan. Waxaa laguugu khasbi kara in aad Canada ka baxdo.

Waxaad Maxkamadda Federalka ah ka codsan kartaa in ay dib u eegaan go'aanka IRB. Waa in aad codsiga ku sameysaa muddo 15 cisho gudahooda ah oo laga billaabo taariiqdii aad go'aanka heshay.

Markey waaxda socdaalku diyaar u yihiin in ay khasab kugu dhoofiyaan, waxy ku siinayaan foomka

aad ku codsanaysid in la baro in aad halis la kulmi doontid haddii lagu dhoofiyo (Pre-Removal Risk Assessment) ama PRRA. Kiisaska qaarkood, markey eegaan natiijada PRRA, wey kuu oggolaanayaan in aad Canada sii joogtid. Waa inaad foomka aad ku codsanaysid PRRA ku xereysaa muddo 15 cisho gudahooda oo ka soo bilaabma maalintii lagu siiyey foomka haddii kale Canada ayaa lagaa saari karaa ka hor inta aan PRRA-ka go'aan laga gaarin.

Waxaa wanaagsan in garyaqaan ama kilinikada sharciga ay kaa caawiyaan codsiyadaan. ☞

**Waxaa jiri kara siyaabo kale oo aad si sharci ah Canada ku sii joogi kartid. Boggaan waxaan uga hadleyna warar guud ahaaneed oo keliya. Raadso la-talin sharciyeed oo la xiriirta xaaladaada xataa kahor inta ayan IRB go'aan ka gaarin andacoodkaaga qaxootinimo.**

## Sida kaalmo loo helo

**Findhelp** waa hey'ad beeleed oo dadka ku caawisa luqado badan. Waxey teleefoonka ka jawaabaan afar iyo labaatanka saac (24-ka saac), toddobada beri ee asbuuc walba.

Waxey kuu sheegi karaan:

- meesha aad cawinaad sharci ka heli kartid, iyo
- sida aad ula xiriiri kartid hey'ad dejineed ama hey'ad beeleed oo aad ka heli kartid caawinaad noocyo kale ah.

Findhelp kala xiriir:

☎ Lacag la'aan ah  
(Toll-free) ..... **1-866-667-5366**

☎ Lacag la'aan ah ee dadka  
maqalka ka dhibaateysan  
(Toll-free TTY) ..... **1-888-340-1001**

💻 [www.211ontario.ca](http://www.211ontario.ca)

## Caawinaado kale:

Waxaa soo diyaariyey CLEO (Community Legal Education Ontario/Éducation juridique communautaire Ontario) iyagoo ay kala shaqeyeen [CLEO Six Languages Advisory Group](http://www.cleo.on.ca), oo ka kooban 10 hey'adood oo xubin ka ah.

Mashruucaan waxaa maalgaliyey Ontario Trillium Foundation iyo Legal Aid Ontario.

CLEO waxey Findhelp uga mahad celinaaysa caawinaada teleefoonka oo ay mushruucaan ka geeysteen.

Booqo [www.cleo.on.ca](http://www.cleo.on.ca) si aad bogogaan iyo warar kale ugula soo baxdid.